

XAQIIQOOYINKA KOOBAN EE

Isbadalada Caymiska ee NY State of Health inta lagu jiro Xaalada Degdega ah ee Korona fayras

Ha joogin bilaa caymis.

NY State of Health ayaa ah Suuqa (Marketplace) rasmiga ah ee Caymiska caafimaadka York.

Waxaan halkaan ujoognaa inaan kucaawino.

Hadda Codso.

 Booqo barta onlaynka ah ee nystateofhealth.ny.gov

 Wac taleefanka
1-855-355-5777
TTY: 1-800-662-1220

 Kala xariir Caawiyaha Dhanka Diiwaangalinta ciwaanka
info.nystateofhealth.ny.gov/findassistor

NY State of Health waxay u hoggaansantaa sharciyada xuquuqaha madaniga Federaaliga ee lagu dabihi karo iyo sharciyada gobolka, oo wax kuma takoorto qaababka isirka, midabka, asalka qaranka, caqiidada/diinta, sinjiga, da'da, heerka guurka/qoyska, diiwaanka xabsiga lagu qaatay, dembi kuhelida falka dambi, aqoonsiga sinjiga, qaabka galmada, sifooyinka u nuglaanshaha hidda sidaha, heerka guurka, gabood falka guriga heerka dhibanaha iyo/ama aargoosiga.

Inaad lahaato caymis caafimaad waa muhiim. Hadda ayay ugu muhiimsan tahay abid.

NY State of Health waxay qaaday talaabooyin badan si loo caawiyo dadka reer New York ee aan haysan caymiska ama luminaaya caymiskii ay ka heli jireen shirkada ay u shaqeeyaan.

Su'aalaha Inta badan la Isweydiyo:

Isbadalada Dakhliga iyo Luminta Caymiska Shirkada aad U shaqayso:

Maxay tahay inaan sameeyo haddii aan lumiyay caymiskayga caafimaadka ee shirkada aan u shaqeeyo ama aanan awoodin qarashka caymiska COBRA ee ay bixiso shirkada aan u shaqeeyo?

- Waxaad xaq u yeelan kartaa caawimaad lagaa siiyo qarashka caymiska caafimaadka ee ay bixiso NY State of Health, ama waxaad u qalmi kartaa caymis bilaash ah.
- Ha sugin si aad u codsato. waa inaad codsataa 60 maalmood gudahood marka aad waydo caymiskaaga si aad u xaqiijiso inaad awoodo inaad iska qorto caymiska sanadkaan.

Maxay tahay inaan sameeyo haddii dakhligaygu isbadalo aana mar hore ka diiwaan gashanaa caymiska ay bixiso NY State of Health? Ma heli karaa caawimaad dheeraad ah oo layga siiyo qarashka caymiskayga?

- Waxaad u qalmi kartaa in lagaa caawiyo dhiibista qarashka caymiskaaga. Koontadaada gali dakhliga cusub ee kusoo gala 60 maalmood gudahood kadib marka dakhligaagu isbadalay. Waxaad u qalmi kartaa caawimaad dhaqaale oo yarayn karta qarashka kaaga baxa caymiska.

XAQIIQOYINKA
KOOBAN EE

Dookhyada Caymiska Caafimaadka ee NY State of Health inta lagu jiro Xaalada Degdega ah ee Korona fayras

Waa maxay Sharciga Gurmadka, Caawimaad iyo Amaanka Dhaqaale ee Korona Fayras (Coronavirus Aid, Relief and Economic Security (CARES)?

Sharciga Coronavirus Aid, Relief and Economic Security (CARES)

waxaa ansixiyay aqalka Koongareeska waxaana saxeexay si uu u dhaqan galo Madaxwayne Trump bishii Maarso 27th, 2020. Gurmadkaan dhan \$2.2 tirilyan oo caawimaad dhaqaale ah waxaa loo ansixiyay in looga difaaco dadka Ameerikaanka ah saamaynta dhanka caafimaadka dadwaynaha iyo dhaqaalaha ee cudurka COVID-19.

Sharciga CARES wuxuu caawimaad dhaqaale siiyaa shaqaalaha, qoysaska, iyo ganacsiyada yaryar ee Maraykanka, wuxuuna muhiimada saarayaa joogtaynta shaqooyinka shirkadaha Maraykanka.

Qarashkaadka CUSUB ee Dakhliga Federaalka/ Magdhawga Shaqo La'aanta ee cudurka COVID awgiis:

Waxaan helay lacag iiga timid Sharciga CARES ee federaalka (oo badanaa loo yaqaano lacagta kaalmaatiga ah). Tiradan lacagtaan ma lagu tirinayaa dakhligayga markaan codsanaayo caymiska NY State of Health?

- Maya. Lacagta kaalmada ah laguma tirinaayo dakhliga qof kasta oo codsanaaya caymiska NY State of Health. Macaamiisha u qalma waxay heli doonaan lacag halmar la bixinaayo oo ay ka helayaan Waaxda Kaydka ee Maraykanka (U.S. Department of the Treasury). Lacagahaan waxaa lagu qaybiyaa sida ku cad sharciga cusub ee federaalka, oo loo yaqaano Sharciga CARES, kaas oo loo sameeyo si looga jawaabo aafada COVID-19. Macaamiisha u qalma waxay heli doonaan lacag halmar la siinaayo oo dhan \$1,200 qof kasta oo qaangaar ah iyo \$500 oo la siinaayo ilmo kasta.

Waxaan qaataa Magdhawga Shaqo La'aanta ee Aafada Cudurku Keentay oon ka helo gobalka taasoo ay sii dheer yihiin gunooyinkayga shaqo la'aanta ee caadiga ah. Ma la iga doonayaa inaan u qoro ka dakhli ahaan marka aan codsanaayo caymiska caafimaadka ee ay bixiso NY State of Health?

- Adigga ayay kugu xiran tahay. Lacagaha lagu baxsho Barnaamijka Mahdhawga Shaqo la'aanta (\$600 asbuuc kasta) waxaa loo xisaabshaa dakhli ahaan dadka ka qoran NY State of Health, laakiin looma xisaabsho dadka kale.
- Soo sheeg Lacagtaada Kaalmada ah haddii:
 - Aysan carruur kuu joogin* guriga aad dagan tahay, IYO
 - Dakhligaaga sanadlaha ah uu ka badan yahay \$25,520 halkii qof ama \$34,480 dadka lamaanayaasha ah
- HA soo sheegin Lacagtaada Kaalmada ah haddii:
 - Ay carruur kuu joogto.*
 - Dakhliga aad filayso ee sanadlaha ah uu ka yar yahay \$25,520 halkii qof ama \$34,480 dadka lamaanayaasha ah.
- Haddii aad u baahan tahay inaad wax ka badasho codsigaaga si aad ugu darto Magdhawga Shaqo La'aanta ka dhalatay Aafada cudurka oo aad dakhli ahaan u qorayso, Caawiyaha NY State of Health iyo Adeegga Macaamiisha ayaa diyaar u ah inay kaa caawiyaan dhamaystirka codsigaaga.

**Erayga "carruur" waxaa looga jeedaa ilmo kayar 19 sano jir ah, ama 19 sano iyo 20 sano haddii uu yahay arday buuxa.*

XAQIIQOYINKA
KOOBAN EE

Dookhyada Caymiska Caafimaadka ee NY State of Health inta lagu jiro Xaalada Degdega ah ee Korona fayras

Mudooyinka Caawimaada iyo Qarashka Caymiska:

Waxaan iska qorayaa Essential Plan (EP) Waxaana baxshaa lacagta joogtada ah ee \$20 bil kasta. Ma la iga doonayaa inaan lacagtayda koobaad ee joogtada ah bixiyo 10 maalmood gudahood marka caymiskaygu biloowdo?

- Inta lagu jiro mudada xaalada degdega ah ee Korona fayras, caymisyada caafimaadka ayaa ku siinaaya muddo dheeraad ah ood ku bixiso qarashkaaga koobaad ee \$20 ah. Waa inaad la hadashaa caymiska caafimaadka ee aad iska qortay.

Waxaan iska qorayaa Qualified Health Plan (QHP). Ma la iga doonayaa inaan lacagtayda koobaad ee joogtada ah bixiyo toban maalmood gudahood kadib taariikhda caymiskaygu biloowdo?

- Haa. Dhammaan dadka iska qora QHP, ayna ku jiraan dadka bixiya lacagta joogtada ah ee buuxda iyo dadka hela caawimaada canshuurta ee lacagta joogtada ah ee hormariska ah (advance premium tax credits (APTC), waxaa laga doonayaa inay qarashkooda joogtada ah ee koobaad baxshaan si caymiskoodu u biloowdo. Caymisyada qaar ayaa kordhin kara mudada 10 maalmood ah. Waa inaad la hadashaa caymiska caafimaadka ee aad iska diiwaangelinayso.

Waxaan mar horeba ka: ka diiwaangashanaa Qualified Health Plan waxaana layga caawiyaa qarashka caymiska aan ka helo APTCs. Muddo intee le'eg ayay tahay inaad bixiyo lacagta joogtada la iiga qaado ee billaha ah?

- Inta lagu jiro mudada xaalada degdega ah ee aafada Korona fayras, mudada waqtiga ee ay tahay inaad dhiibto caymiskaaga billaha ah, ee loo yaqaano "mudada caawimaada", ayaa la kordhiyay asagoo markii hore ahaa 90 maalmood haddana ah 120 maalmood. Uma baahnid inaad muujiso inaad ku jirto dhibaato dhaqaale si aad ugu qalanto mudada caawimaada ee la kordhiyay. Foomka lacag dalbashada ee aad ka hesho caymiskaaga caafimaadka ayaa muujinaaya taariikhaha lagaa rabo inaad qarashka bixiso.
- Haddii aadan lacagta joogtada ah ku dhiibin inta lagu jiro mudadaan 120 maalmood ah ee caawimaada, caymiskaaga caafimaadka ayaa joojin kara caymintaada maalinta 60aad ee mudada caawimaada mana heli doontid caymis lagaa siiyo adeegyo kasta ood isticmaashay taariikhdaas kadib waxaana suuragal ah inaad helin caymis mudada ka hartay sanadka, ilaa inaad qabto maahee xaalad caafimaad oo nolosha la xariira oo keenaysa inaad u qalanto SEP.
- Haddii aad dhib ku qabto dhiibista qarashka caymiskaaga, la xariir NY State of Health, ama la hadal caymiskaaga caafimaadka. Waxaa imaan kara dookh kaas ka qiimo jaban ood heli karto.
- **Ogoow:** NYS Department of Financial Services ayaa soo saartay [tilmaan](#) ku socota shaqsiyaadka bixiya lacagta buuxda ee joogtada ah ee caymiska. Cadaynta dhibaataada kaasoo gaartay COVID-19 ayaa laga doonayaa dadkaan.